WASAARADDA WAXBARASHADA HIDDAHA
IYO TACLIINTA SARE

IMTIXAANKA FASALKA 4AAD. 2017

# AF-SOOMAALI

2017

XAFIISKA IMTIXAANKA IYO SHAHAADADA

SomExams

SOM EXAMS

Magaca.........................................

Dugsiga:........................................

Lambarka ardayga:...........................

# DAWLADDA FADARAALKA SOOMAALIYA

## WASAARADDA WAXBARASHADA,HIDAHA IYO TACLIINTA SARE

## FORM 4 MEY 2017

## IMTIXAANKA AF-SOOMAALIGA

## WAKHTIGA: LABO SAACADOOD

SAMAAN PRINT

**WARBIXIN IYO FARRIIN:**

- Imtixaanku waxa uu ka kooban yahay 12 bog oo daabacan
- Tiri oo hubi haddii wax kaa maqan yihiin u sheeg horjoogahaaga ku ilaalinaaya.

| | |
|---|---|
| **Qaybta 1-aad: Goobo geli** | **(30-dhibcood)** |
| **Qaybta 2-aad: Naxwe** | **( 10-dhibcood)** |
| **Qaybta 3-aad: Murti iyo Maahmaaho** | **(20-dhibcood)** |
| **Qaybta 4-aad: Maanso iyo Ereyo** | **(25-dhibcood)** |
| **Qaybta 5-aad: Curis** | **(15-dhibcood)** |
| | **Dhibcaha guud (100)** |



• www.somexams.com ✳ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com

SOM EXAMS



U adeegso boggan shaqada dheeraadka ah. Lama saxayo wixii aad ku qorto.

SAMAAN PRINT



• www.somexams.com * info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com

## SHEEKO

## Dhibaatada Qaxa

Guuleed qoyskoodu waxa uu deggennaa magaalada Xamar, waxa ay ka koobnaayeen shan caruur ah, Aabbe iyo Hooyo. Aabbihii waxa uu dukaan ku lahaa xaafadda Xamar-weyne. Iyaga oo meeshaa deggen waxa qarxay dagaalkii sokeeye, sannadkii 1991-kii.

Guuleed qoyskoodii waxa ay maqleen rasaas dhacaysa. Waxa ayna arkeen deriskii oo qaxaya. Qoyskii waxa ay ku tashadeen in ay u qaxaan miyiga Xamar ee ka sokeeya Balcad. Waxa ay qaateen labo boorso oo dhar ku jiro, raashin, joodariyo, maacuun iyo salliyo ay ku tukadaan. Markii ay in badan socdeen ayaa ay qaadi kari waayeen alaabtii. Guri u dhawaa meeshii ay marayeen ayaa ay garaaceen, islaan waayeel ah oo keligeed guriga joogtay ayaa ay u dhiibteen labadii boorso ee dharku ku jiray. Habeenkii waxa ay u hoydeen geed hoostii. Subaxii ayaa ay meeshii ka boqooleen (tageen). In badan markii ay socdeen ayaa ay caruurtii buuq iyo oohin isku dareen. Geed qurac ah oo ku yaalay meel bacaad ah ayaa ay degeen. Aabihii reerku waxa uu qaatay labo caagadood si uu biyo u raadiyo, Hooyana waxa ay doontay xaabo wax lagu karsado. Aabiihii reerku markii uu biyihii keenay,hooyadii reerkuna in xaabo ah soo gurtay,ayaa uu aabbe ku yiri hooyadii reerka: "Meeshani waa cidla, biyo iyo derisna midna ma leh. Markaas caruurta u kexee meel deegaan fiican leh, aniguna dukaankii ayaan ku noqonayaa, si aan waxa loo baahan yahay uga soo qaado".

Hooyo ayaa tiri: "anigu dhulka ma aqaani,caruurtana qaar ayaa buka ee hanaga tegin". Cabaar haddii ay doodeen ayaa aabbihii tegey markii ay isku waafaqeen in uu baxo. Reerkiina habeenkii ay seexdeen geedkii hoostiisa. Subaxdii ayaa hooyo aragtay caruurtii oo qaarkood qufacayaan, qaarkoodna shuban bilaabeen. Guuleed waxa ay hooyadii ku tiri: "hooyo waxa aan raadinayaa meel biyo leh ee caruurta iyo alaabta la sii joog". Caruurtii markii ay hooyadood ka daba ooyeen waxa ay ku tiri: " hooyo haddeer ayaa aan soo noqonayaa ee Guuleed la sii jooga" caruurtii waxa u yimid nin wanaagsan oo dadka baadiyaha ka mid ahaa, waxa aanu ka waraystay caruurtii meesha ay ka yimaadeen, cidda la joogta iyo waxa ay u baahan yihiin, waxaanu u keenay raashin iyo biyo. Hooyadii markii ay soo noqotay waxa ay u timid caruurtii oo wajigooda farxadi ka muuqato, waxaanay u mahadcelisay ninkii. Markaas ayaa ay reerkii u rartay meel fiican oo la deggen yahay.



• www.somexams.com ✳ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com

Qoys meesha ay u qaxeen deggennaa ayaa reerkii soo dhaweeyey oo siiyey kiish qamaddi ah iyo aqal yar oo buul ah. Ogow gurigaaga oo aad ka qaxdaa waxa ay keeni kartaa isbeddel xun oo saameeya nolosha qofka.

**Qaybta 1-aad: Goobo geli jawaabta saxda ah** **(30-dhibcood)**

1. Guuleed qoyskoodu waxa ay deggenaayeen
   b. Xarar-dheere
   t. Xaafuun
   j. Xamar
   x. Ximin iyo Xeeb

2. Qoyskii waxa ay maqleen
   b. Gariir
   t. Dabaaldeg
   j. Sawaxan
   x. Rasaas dhacaysa

3. Waxa ay ku tashadeen in ay u qaxaan
   b. Balcad sokodeeda
   t. Beled-weyn
   j. Beled-xaawo
   x. Baydhabo

4. Waxa ay qaateen labo boorso
   b. oo hub ku jiro
   t. oo dhar ku jiro
   j. oo doolar ku jiro
   x. intaba

SAMAAN PRINT

5. Reerkii markii uu qaxay waxa la siiyey
   - b. Kiish qammaddi ah iyo Masaggo
   - t. Kiish qammaddi ah iyo buul yar
   - j. Adhi yar
   - x. Adduun yar

6. Guuleed hooyadii waxa ay ku tiri
   - b. Caruurta iyo alaabta la sii joog
   - t. Ariga la sii joog
   - j. Geela la sii joog
   - x. intaba

7. " Meeshani waa cidla, biyo iyo deris midna ma laha" hadalkan waxa yiri:
   - b. Awoowo
   - t. Aabbe
   - j. Adeero
   - x. Midna

SAMAAN PRINT

8. Caruurtii waxa u yimid
   - b. Nin wadaad ah
   - t. Nin wanaagsan
   - j. Nin weyn
   - x. intaba

9. Caruurtii qaar ka mid ahi
   - b. waa ay bukeen
   - t. waa ay bed qabeen
   - j. waa ay beratamayeen
   - x. waa ay baahnaayeen



• www.somexams.com ✻ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com

10. Reerkii habeenkii waxa ay seexdeen
    - b. Geed hoostii
    - t. God hoostii
    - j. Gidaar hoostii
    - x. Guri-cas

**Qaybta 2-aad: Naxwe** **( 10-dhibcood)**

b. Kasoo saar magacyada gaarka ah weerahan soo socda

1. Cali waxa uu la kulmay saaxiibkiis

..............................................................................................................................................
..............................................................................................................................................
..............................................................................................................................................

2. Muqdisho waa magaalo madaxda Soomaaliya

..............................................................................................................................................
..............................................................................................................................................
..............................................................................................................................................

3. Moosku waxa uu ka baxaa dalkeenna

..............................................................................................................................................
..............................................................................................................................................
..............................................................................................................................................

4. Caasha waxa ay dhaqaysaa dhar

..............................................................................................................................................
..............................................................................................................................................
..............................................................................................................................................

SAMAAN PRINT



• www.somexams.com ✳ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com

5. Geedka cadaadu waxa uu leeyahay xabag

.......................................................................................................................

.......................................................................................................................

.......................................................................................................................

T) Ka soo saar weerahan soo socda falka ku jira

1. Cali waxa uu dilay mas

.......................................................................................................................

.......................................................................................................................

.......................................................................................................................

2. Faadumo waxa ay cuntay soor

.......................................................................................................................

.......................................................................................................................

.......................................................................................................................

3. Geelii waa uu cabbay

.......................................................................................................................

.......................................................................................................................

.......................................................................................................................

4. Baruhu waxa uu qoray cashar

.......................................................................................................................

.......................................................................................................................

.......................................................................................................................

5. Ugaarsaduhu waxa uu toogtay deero

.......................................................................................................................

.......................................................................................................................

.......................................................................................................................

SAMAAN PRINT



• www.somexams.com * info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com

**Qaybta 3-aad: Murti iyo Maahmaaho** **(20-dhibcood)**

b. Sharrax kooban ka bixi murtidan iyo maahmaahahan hoos ku xusan

1. Hunguri wax ka weyn la mariyaa waa uu dilaacaa

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

2.Cilmigu waa caqli la biirshay

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

3. Ninkii seexdaa saciisi dibi dhalay

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

4. Far keliyi fool ma dhaqdo

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

5. Arrin xumo abaar ka daran

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

SAMAAN PRINT



• www.somexams.com ✻ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com

6. Aan wada hadalno waa aan heshiino

....................................................................................................

....................................................................................................

....................................................................................................

....................................................................................................

7. Dhammaystir murtidan hoos ku xusan

b. Nin daad qaaday........................................................................................

t. ...................................waa shil.

SAMAAN PRINT

**Qaybta 4-aad: Maanso iyo ereyo** **(25-dhibcood)**

**B. Maanso**

1. Sharrax ka bixi tuducyadan hoos ku xusan
   - Haddii dunida lagu waarayo oo daa'im noqonayso
   - Waxaan laga dileen nebiyadii laysu soo diraye

....................................................................................................

....................................................................................................

....................................................................................................

....................................................................................................

....................................................................................................

....................................................................................................

....................................................................................................

2. Falanqee macnaha tuducyadan hoos ku xusan
   - Meel buu ka foocaa likuhu milay kaliilced
   - Mardanbuu timoyuluq noqdaa madaxii aasnaaye
   - Midab cad waarigeed waa dundumo wuxuu ka muuqdaaye

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

**T. Ereyo**

**1. Qor macnaha ereyadan**

b. Timo-yuluq:

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

t. Waarig

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

j. Waarayo

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

x. Kufkooda

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

kh. Mayrac

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

SAMAAN PRINT

SOM EXAMS

Qaybta 5-aad: Curis (15-dhibcood)

1. Ka dooro mawduucyadan soo socda mid ka mid ah, kana qor ugu yaraan (150) erey.

   b. **Dhibaatada Tahriibka**

   t. **Waxyeellada Qabyaalladda.**

.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................

SAMAAN PRINT



• www.somexams.com ✱ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com

SOM EXAMS



..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................
..........................................................................................................................................................

SAMAAN PRINT

Dhammaad



• www.somexams.com ✳ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com